



## Sidee Ayaan Ku Helaa Biyoheyga?

Biyaha waxaa laga soo bambeyaa warshadda Maplewood, waxaa la soo marsiyaa tubooyin geeya saldhigga bambada, haamanka, iyo haamanka taagan, kaddibna tubooyinka biyaha ayaa u qeybiya khadadka adeegga biyaha guryaha iyo ganacsatada.



Adiga waxaad leedahay khadka adeegga biyaha laga bilaabo khadka hantida ilaa gudaha guriga. Waxaan leenahay khadka adeegga biyaha laga bilaabo khadka hantida ilaa gudaha jidka.

## Macluumaad Badan

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tayada biyaha ama macdanta “lead” xagga biyaha la cabbo, tag ilahaan:

- Si aad u heshid koobiga warbixintena tayada biyaha sannadka, ee laga helo macluumaad ku saabsan heerarka macdanta “lead” ee ku jira biyahena, tag [www.stpaul.gov/waterquality](http://www.stpaul.gov/waterquality). Si aad u heshid koobi adag, la xariir adeegga macaamilka, telefoonka 651-266-6350.
- Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan macdanta “lead” ee ku jirta biyaha la cabbo, akhri buugga Iska Ilaalinta Macdanta “Lead”. Tag [www.stpaul.gov/water](http://www.stpaul.gov/water) kaddibna hoos u soco ilaa aad ka timaadid daabacaadyada ku yaal dhinaca gacanta midig. Dooro In Aad Macdanta “Lead” Dibaddo Dhigto. Si aad u heshid koobi adag, wac adeegga macaamilka, telefoonka 651-266-6350
- Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan macdanta “lead” guud ahaan, bogga internetka Minnesota Department of Health (Waxda Caafimaadka Minnesota) [www.health.state.mn.us/lead](http://www.health.state.mn.us/lead)
- Si biyahaada looga baaro macdanta “lead” ama haddii aad qabtid arrimaha la xariira tayada biyaha, la xariir shaybaarkena tayada biyaha, telefoonka 651-266-1635
- Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan baddalaadda leenkaada adeegga biyaha, ama si aad u ogaatid haddii aad qabtid leemanka adeegga macdanta “lead”, wac miiskena adeegga injineeriyada, telefoonka 651-266-6270



1900 Rice Street  
Saint Paul, MN 55113  
651.266.6350

## Saint Paul Regional Water Services (Adeegyada Biyaha Gobolka Saint Paul)



## Macluumaadka ku saabsan tayada biyaha, geynta iyo macdanta “lead” ee ku jira biyaha la cabbo

### Meesha Biyahaada Ka Yimaado

Saint Paul Regional Water Services (Adeegyada Biyaha Gobolka Saint Paul) waxay bixisaa biyo nadiif ah, biyo leysku halleyn karo iyo adeegyada la siiyo 425,000 dad ku nool Saint Paul iyo bulshadaha ku wareegsan.

Waxaan biyahena ka qaadanaa Wubiga Mississippi iyo silsilad ka kooban balliyo.

Waxaan qabnaa keyd ku filan qeybinta isku celceliska biyaha la isticmaalo maalintii 40 malyan gallan, haddii loo baahdo.

Si biyaha looga dhigo biyo ku fiican cabidda, waxaan biyahaan ceysiinka ah u dirnaa warshadda nadiifinta halkaas aan ku jilcino, miirno, kana dilno jeermiga ka hor inta loo qeybinin macaamiishena in ka badan 1,200 mayl tubooyinka biyaha.

Waxaan ku siinaa biyo tayo sare oo si toos ah loo geeyo tubada gurigaada si aad u isticmaashid.

Waxaan kumaanaan baaritaan ku sameynaa biyahena bil kasta si loo habsado in aan ku siino biyo nadiif ah, oo la cabi karo.

SPRWS waxay u hoggaansan tahay dhamaan sharciyada deegaanka, gobolka iyo qaranka ee la xariira tayada biyaha.

## Khadadka Adeegga Macdanta “Lead”

Waxaan qiyaasnay in ilaa 28,000 guri oo ku yaal Saint Paul weli hantidaa gaarka ku leeyahiin khadadka adeegyada macdanta “lead”.

Guryaha la dhisay 1927 ka hor waxay qabaan khadadka adeegga macdanta “lead” halkaas oo qaar ka mid ah guryaha la dhisay inta u dhexeyso sanooyinka 1944 iyo 1947.

## Sidee Ayaan Ku Ogaadaa Haddii Aan Qabo Macdanta “Lead”?

Waxaad wici kartaa waaxdena injineeriyada, telefoonka 651-266-6270 si aad u ogaatid haddii macdanta “lead” ku jirto khadadka adeegga jidka ama hantida gaarka loo leeyahay.

Diiwaanada taariikhdiis hore ee 1800dii waxay inta badan muujiyaan dhismaha khadka adeegga hantida gaarka, balse ma muujiyaan dhamaan. Waxaa naga maqan diiwaanka ku dhawaad 8,000 khadadka adeegga guryaha gaarka loo leeyahay, mana bixin karno xog sax ah oo ku saabsan guryahaas.

Hase ahaatee, tubooyinka macdanta “lead” waa sida midabka dambasta, waa jilicsan yahiin in ku filan taasoo suurtoogelisa in si fudud loogu xoqo furaha guriga. Biyo geliyaha shattiga haysto ayaa kugu kaalmeyn karo in aad ogaatid haddii biyo gelinta reerkaada ka samaysan yahay macdanta “lead.”

## Maxay Tahay Sababta ay Muhiim u Tahay?

Macdanta “lead” ee ka timaado leemanka adeegga macdanta “lead” waxay geli kartaa biyaha la cabbo. Biyaha fadhiga muddo dheer waxaa soo raaci kara qiyaas madanta “lead” oo ka yimaada khadadka adeegyada, khaas ahaan haddii uu fadhigay in ka badan lex saac, sida habeenka.

SPRWS waxay ka shaqeysaa biyaha si loo yareeyo qiyaasta macdanta “lead” ee ku jirta biyaha la cabo, waxay la socotaa iyo waxay habeysaa heerarka pH iyo heerarka “alkaline” ee biyaha, taasoo yareysa macdanta “lead” ee soo gasha biyaha.

Xattaa haddii ay sidaas tahay, xoogaa macdanta “lead” ayaa geli karta biyaha.

**Macdanta “lead” waxay leedahay waxyeelo. Waxay saamayn kartaa horumarka jirka iyo maskaxda caruurta iyo ilmaha yaryar, waxay sabab u tahay cilladaha la xariira inta uu socdo dareenka qofka, dhageysiga, iyo awoodda waxbarashada caruurta, iyo waxay dadka waaweyn ku kordhisaa cadaadiska dhiigga.**

## Xaggee Kale Ayay Macdanta “Lead” Ka Timaadaa?

Macdanta “lead” waxaa kaloo laga helaa alxanka tubooyinka maxaasta ee la geliyay intii ka horeysay 1985, iyo biraha macdanta “brass” ee la geliyay intii ka horeysay 2014.

EPA waxay ku qiyaastay in boqolkii 20 ku dhawaashada macdanta “lead” ka timaado biyaha, halka boqolkii 80 inta hartay ku dhawaasha macdanta “lead” ka timaado wasakhda, boorka reerka, rinjiga macdanta “lead”, hawlaha dhariga, iyo hawada.

## Maxaan Samaynaa Si Aan u Yareyno Macdanta “Lead”?

- Waxaan si joogto ah ula soconaa heerarka pH iyo heerarka “alkalinity” biyaha ka yimaada warshadda, waxaan ku hayna heer u ogolaada in xuub la saaro gudaha tubooyinka macdanta “lead”. Xuubkaan korka ka saaran wuxuu yareyaa ku dhawaasha macdanta “lead” xagga biyaha la cabo, kaddib marka macdanta “lead” laga ilaaliyo in uu soo gaaro biyaha. Waxaan nadiifinaa biyaha si loo yareeyo ku dhawaasha macdanta “lead” laga bilaabo 1990dii.
- Waxaan ka saarnay khadadka adeegga biyaha macdanta “lead” ee ku meeleysan laga bilaabo khadka hantida ilaa jidka. Waxaan la shaqeynay in aan khadadkaan macdanta “lead” ka saarno siistimkana biyaha laga bilaabo 1980dii.
- Dadka daggan Saint Paul waxaan siinaa kaalmada maaliyadda, marka aan siino habka ay saaridda khadadka biyaha macdanta “lead” ugu daraan canhuurta hantidooda.
- Dadka qeyb ahaan iska saaray macdanta “lead” waxaan siinaa macluumaad ku saabsan sida biyaha guryahooda loo raaciyoo kaddib marka shaqada dhismaha la dhamaystiro.
- Dadka guryaha leh waxaan siinaa nadiifiyaha biyaha la xaqiijiyay si looga saaro macdanta “lead” iyo filtaro gaara ilaa lex bil.
- Waxaan mar kasta xiiso u qabnaa in aan adiga kaa maqalno arrinta ku saabsan tayada biyaha ama faalo kale. Kuwaan waxaa la samayn karaa kaddib marka la waco leenka adeegga macaamilka, telefoonka 651-266-6350 ama marka email loo diro [waterinquiries@ci.stpaul.mn.us](mailto:waterinquiries@ci.stpaul.mn.us).

## Maxaan Samayn Karaa Si Aan U Yareeyo Macdaanta “Lead”?

- Wac SPRWS si aad u ogaatid haddii aad khadadka adeegga macdanta “lead” ku jirto jidka soo gala gurigaada, ama hantida gaarka ee soo gasha gurigaada.
- Haddii khadka adeegga ka samaysan yahay macdanta maxaasta, fursadaada in aad ku dhawaatid macdanta “lead” ee ku jirta biyaha aad ayay u yar tahay.
- Haddii khadka adeegaada uu ka samaysan yahay macdanta “lead”, waxaad khadka adeegaada macdanta “lead” ku baddali kartaa macdanta “maxaasta.” Haddii aad ku nooshahay Saint Paul, waxaad heli kartaa kharashka ku bixi doono oo lagu xisaabo canshuurta hantida lana bixiyo muddo baddalkii la bixin lahaa hal mar.
- Haddii aadan rabin in aad baddashid khadka adeegga macdanta “lead” ama aadan baddali karin, waxaad socodsiin kartaa biyaha qabow muddo 3 - 5 daqiiqo ka hor inta aadan u isticmaalin cabid ama karis haddii biyaha fadhigay in ka badan lex saac. In biyo la raaciyoo musqusha iyo in la qabeysto labadaba waxay leeyahiin kaalmo, hase labada daqiiqo ugu dambeyso biyaha socda waa in ay ka yimaadaan tubada aad ka cabi doontid.
- Isticmaal nadiifiyaha biyaha la soo miiray ee loo aqoonsaday ka saaridda macdanta “lead” iyo raac tilmaamaha la socda.
- Biyahaada ha laga baaro macdanta “lead”. Shaybaarkena wuxuu biyaha ku baari doonaa lacag la’aan, wuxuu kuu soo diri doonaa natiijadaha, iyo wuxuu kugu kaalmeyn doonaa in aad tarjumo ku samaysid.

